

2016

XISBIGA WADAJIR

ASAL IYO IFTIIN



[XEERKA XISBIGA WADAJIR]

Xeerka Xisbiga oo ka kooban 49 qodob waxaa la ansixiyey Shirwaynihii aasaaska Xisbiga oo ka dhacay 28 May - 05 June, 2016. Magaaladda Muqdisho



XEERKA XISBIGA WADAJIR

Xeerka Xisbiga oo ka kooban 49 qodob waxaa la ansixiyey Shirwaynihii aasaaska Xisbiga oo ka dhacay 28 May - 05 June, 2016. Magaaladda Muqdisho

QAYBTA 1AAD:

Qodobka 1aad

Magaca Xisbiga

Magaca xisbigu waa xisbiga WADAJIR. Xaruntiisuna waa Muqdisho. Xisbigu waxaa uu laamo ku leeyahay dhamaan Gobolada, degmooyinka iyo tuulooyinka dalka iyo sidoo kale dalka dibadiisa.

Qodobka 2aad

Calanka xisbiga

Calanka xisbiga cadaan dhexda ka taalo Astaanta Xisbiga

Qodobka 3aad

Astaanta Xisbiga

Astaanta xisbigu waa huruud iyo buluug isku jira dhexda Xarafka W oo wayn uga taalo, dusheedana laba gacmood oo isi salaamaya iyo magaca xisbiga, 18 Xidig ku wareegsan tahay kuna taalo ASAL IYO IFTIIN.

Qodobka 4aad

Xarunta Xisbiga

Xarunta Xisbiga waa Muqdisho. Wuxuu Xarumo ku yeelanayaa Dowlad Goboleedyada xubnaha ka ah Dawlada Federaalka ah

Qodobka 5aad

Hiigsiga, Marinka, Ujeedooyinka iyo Mabaadi'da Xisbiga

1. Hiigsiga (Vision)

U hawlgelida sidii loo heli lahaa bulsho Soomaaliyeed oo ka fiyow qabyaalad kana fog gacan ka hadal iyo xagjirnimo diineed lehna wacyi iyo dareen qaranimo, iskuna xilqaanta gudashadda waajibka qaran iyo masuuliyadda ummadnimo, kuna noolaata nabad,

xasilooni, cadaalad iyo karaamad”

2. Maxaanu u tagaanahay (Mission)

Dhismaha dawlad casri ah oo ku dhisan saraynta sharciga, xoojisa dhaqanka madaniga ah ee ku dhisan dimoqoraadiyada iyo cadaalad bulsho, adakaysa midnimada Soomaaliyeed islmarkaana baahisa awooda maamul ee dawladda iyadoo la raacayo habka maamul ee Gunkasoo dhiska iyo hannaanka federaalka.

3. Marinka (means)

U hawlgalka isku keenista xoogaga siyaasadeed si loo helo ujeedo mid ah iyo dadaal midaysan oo lagu furdaamiyo mushkiladaha siyaasadeed si wadajir ahna loogu hawlgalo sidii loo heli lahaa siyaasad caafimad qabta oo musuqmaasuq ka fayow kuna sifaysan hufnaan iyo karti.

4. Mabaadi'da Guud.

- a) Dhowrista madaxbanaanida, doonista wadajirka iyo ilaalinta sharafta qaranka Soomaaliyeed si loo soo celiyo haybadii Qaranimo iyo sharaftii ummada Soomaaliyeed.
- b) Isutaaga xaqiijinta himilooyinka shacabka Soomaaliyeed.
- c) Dib u soo noolaynta dareenkii wadaniyadeed, iskuduubniddii iyo nabad ku wada noolanshihii ummada Soomaaliyeed.
- d) La dagaalanka eexda, musuqmaasuqa, qabyaaladaysiga, xagjirnimada, ku takrifalka hantida iyo awoodda Qaranka.
- e) Dhowrista Xaqa muwaadinka iyo ka hortaga tacyada lidka ku ah xuquuqda aadanaha.

5. Ujeedooyinka

- a) U hawlgalka Sugida amniga iyo xasiloonida muwaadinka Soomaaliyeed iyo soo celinta nidaamkii iyo kala danbayntii.
- b) U hawlgalka dhismaha ciidan qaran oo ilaaliya Dastuurka dalka iyo madaxbanaanimada qaranka.
- c) Hirgelinta nidaamka federaalka si waafaqsan Dastuurka KMG ah kuna jirto danta ummada iyo tan dalka. Xoojinta iyo tayaynta gun ka dhisidda maamulladda heer Federaal, Gobol iyo Degmo.
- d) Dib u habaynta nidaamka siyaasiga iyo u howlgalka sidii loo heli lahaa hanaan siyaasadeed oo xisbiyo ku dhisan lehna sharciyad iyo metelaad.
- e) Dhismaha hay'adaha maamulka dawliga ah gaar ahaan kuwa maaliyadda iyo maamulka guud.
- f) Xoojinta dib u heshiisiinta iyo la dagalaanka afkaarta guracan ee xagjirnimada iyo xoog wax ku doonka.
- g) Meelmarinta siyaasad dibaadeed ku dhisan hirgelint dantaqaran, u hawlgalka xasiloonida gobolka iyo mushkilad la'aan deriska ah (zero problem with the neighbours).
- h) Fududaynta gargaarka Bani'aadanimu dib u dejinta barakacayaasha iyo maaraynta kaalmooyinka dhaqaale si u adeegaysa danta dadlka iyo dadka.

Qodobka 6aad

Xubinimada Xisbiga

Xubinimada xisbigu waa shaqsi umana gudbi karto cidkale lamana kala dhaxli karo waxayna u furantahay qofkasta oo soomaali ah oo buuxiya shuruudaha ku qoran qodobka 7aad ee Xeerka Xisbiga.

Qodobka 7aad

Shuruudaha xubinimada

Qof kasta oo Soomaali ah oo buuxiya shuruudaha hoos ku qoran wuxuu ka mid noqon karaa xisbigan:

1. Inuu ahaado Soomali isla markaana aaminsan Midnimada, Madaxbanaanidda iyo Wadajirka Soomaaliya.
2. In aanay da'diisu ka yarayn 15 sano
3. Inuu caqli ahaan fayowyahay oo uu awood buuxda u leeyahay gudashada xilkiisa xubinimo.
4. Inuu ogol yahay xeerarka iyo barnaamijka siyaasadeed ee xisbiga.
5. Inuu yahay qof ku sifooba akhlaaq wanaag iyo dhaqan asluub leh islamarkaana xubnaha kale ee xisbiga iyo dadka kaleba la yeelan kara xidhiid fiican.
6. Inaan maxakamidi hore ugu xukumin danbiyada lidka ku ah qaranimada iyo jiritaanka dawladnimo.
7. Inuu bixiyaa qaaraanka Xisbiga oo bilkasta ah xadiga kolba ay goaamiyaan gudida fulinta xisbiga.
8. In aanu xubin ka ahayn xisbi/urur siyaasadeed kale.
9. In uu faafiyo barnaamijka Xisbiga una istaago gudashada xilka iyo waajibaadka xubinimo.

Qodobka 8aad

Xuquuqda xubnaha

Xubin kasta oo ka mid ah xisbiga wuxuu xeerkani si buuxda ugu damaanad qaadayaa inu helo xuquuqdan hoos ku qoran:

1. In la dooran karo waxna dooran karo, iyadoo la raacayo xeerka xisbiga loona magacaabi karo xilal xisbiga gudihiisa.
2. Inuu ka qayb qaadan karo hawlaha xisbiga iyo doodaha lagaga hadlayo arimaha xisbiga, waxaanu soo jeedin karaa talooyin khuseeya hawlaha iyo waxqabdkaa xisbiga.
3. Inuu si xor ah u soo ban dhigi karo aragtidiisa soona jeedin karo talooyin ama dhaliilo la xiriira hawlaha xisbiga.
4. Inuu si xor ah uga bixi karo xisbiga isaga oo sheegaya sababta uu uga baxay xisbiga hase yeeshee wax lacag ah looma celinayo.
5. Xubin waliba waa inay heshaa aqoonsi xubinimo.
6. Xubinta doonaysa in ay iska casisho xilka xisbiga

- a) Waa in xubintu usoo gudbisaa arji is casilaad ah laantu ka tirsanaa.
 - b) Waa in xisbigu ka aqbalaa ama ka diidaa 14 maalmood gudahood is casilaada xubinta
7. Xubinta u diwaangashan xisbigu kama wada tirsanaan karto laba xisbi ama urur siyaasadeed isla marka kaliya.

Qodobka 9aad

Waajibaadka Xubnaha

Xubin kasta oo ka mid ah xubnaha Xisbiga waxa ku waajib ah:

1. Inuu u hogaansamo xeerka iyo go'aamada ka soo baxa masuuliyiinta xisbiga heer kastaba ha ahaadee.
2. Inuu barnaamijka siyaasadeed iyo hawlaha xisbiga u fuliso si daacadnimo ah.
3. Inuu ka qayb qaato hirgalinta barnaamijka xisbiga, adeega, horumarinta bulshadiisa iyo abaabulka ummadiisa.
4. Inuu ilaaliyo sirta, hantida iyo sumcada xisbiga.
5. Inuu ummadiisa ku abuurto ama ku abaabulo dareen wadaninimo.
6. Inuu xog ogaal u noqdo xaalada siyaasadeed iyo dhaqaale ee wadanka.
7. Inuu ka hortago wixii iska hor imaad bulsho abuuraya sida kala sooc iyo qaraabo kiil.
8. Inuu soo bandhigo wixii tabosha ah xisbiga gudhiisa laakiin ayna banaanayn inuu banaanka usaaro.

Qodobka 10aad

Waayida xubnimada

1. Xubnimad xisbiga waxaa lagu waayi karaa arimahan soo socda:
2. Hadii qofku iskii iskaga casilo xubnimada xisbiga sida ku xusan qodobka 6aad ee xisbiga.
3. Hadii geeri ku timaado iyadoo aanay dhaxaltooyo noqonayn xubinnimadu.
4. Hadii lacadeeyo inuu ka horyimi xeerka iyo barnaamijka xisbiga, go'aamada gudiyada xisbiga heer kastaba. Go'aankaas lagu eryaayo waxaa soo jeedinaya gudiyada laamaha, iyaga oo soo raacinaya warbixin arrintiisa la xidhiidha, iyagoo usoo gudbinaaya gudigga anshaxa.
5. Hadii qofku xilkiisa gudanwaayo caafimaad ahaan.
6. Hadii ay xubintu samaysato, ku biirto ama u olalayo urur siyaasadeed kale

QAYBTA 2AAD:

Qodobka 11aad

Qaab Dhismeedka Xisbiga

Qaab dhismeedka xisbigu wuxuu ka koobanyahay

1. Shirwaynaha xisbiga.
2. Golaha Dhexe.
3. Gudida Fulinta.
4. Gudida Gobolada.
5. Gudida degmooyinka, Gudiga tuulooyinka/xaafada iyo laama dibadda.

Qodobka 12aad

Shirweynaha Xisbiga

1. Shirwaynaha xisbigu waa hay'ada ugu saraysa xisbiga sharci ahaan xaga awooda, waxaana shirwaynuhu ka kooban yahay:
 - a. Ergooyinka ka socda gobollada, degmooyinka iyo laamaha dibadda.
 - b. Dhamaan Xubnaha golaha dhexe ee xisbiga.
 - c. Xubnaha kaga jira golayaasha qaranka.
 - d. Tirada ergooyinka shirwaynuhu waxa tiradooda go'aan ka gaadhaya Guddiga Fulinta.

Qodobka 13aad

Shirweynaha Caadiga ah ee Xisbiga

1. Shirwaynaha xisbiga waxaa la qabanayaa afartii sanaba mar shirkiisa caadiga ah oo laga soo bilaabo maalintii uu xirmay shirwaynihii u danbeeyay, waxaana soo jeedinaya maalinta la qabanayo iyo goobta lagu qabanayo gudidada fulinta, isla markaana wuxuu ku ansaxayaa cod haldheeriya oo golaha dhexe ah sadex bilood ka hor inta aanay dhamaan mudada shanta sano. Waxaana lixdan maalmood ka hor maalinta loo cayimay baahinaya gudida fulinta.
2. Ergooyinka kasoo qaybgalaya waxa cayimaadooda soo jeedinaya gudida fulinta. Waa in soo jeedinta cayimaada ay ansixiyaan golaha dhexe kalfadhiga rasmiga ah ama kalfadhi aan caadi ahayn.
3. Ergooyinka waxa soo xulaaya gudiyaada heer gobol iyo degmo.
4. Haddii shirwaynuhu ku qabsoomi waayo mudadaas loo cayimay gudida fulintu laba bilood ka hor waxay soo jeedinaysaa in dib loo dhigo mudo aan ka badnayn lix bilood oo ka bilaabmaysa maalintii loo cayimay ee uu qabsoomi waayay shirweynuhu. Waxaana ansixinaaya golaha dhexe oo ku ansixinaaya cod $2/3$. Gudida fulinta waxa aay ku baahinay mudo shan iyo afartan maalmood ka hor maalinta loo cayimay qabashada shirwaynaha.
5. Gudida qabanqabada waxa magacaabaya Gudoomiyaha xisbiga markaa uu la tashado hogaanka sare ee Xisbiga.

Qoddobak 14aad

Shirweynaha Aan Caadiga Ahayn

1. Hadii ay timaado sabab lagama maarmaan ka dhigta in la qabto shir aan caadi ahayn, waxaa soo jeedin kara:

- a) Gudiga fulinta oo ugudbinaya Golaha Dhexe oo ku ansixinaaya 2/3 tirada xubnaha golaha dhexe ee kalfadhiga joogta.
- b) 1/3 xubnaha Golaha Dhexe oo u gudbinaya Golaha Dhexe oo ku ansixinayaa 2/3

2. Golaha dhexe waxaa uu cayimayaa mudada la qabanayo shirwaynaha iyo goobta lagu qabanaayo isla markaana gudidada fulinta ayaa ku baahinaysa mudo shan iyo toban maalmood gudahood ah.

3. Ergada Shirwaynaha aan caadiga ahayni waa ergadii shirwaynuhii u danbeeyey ka qayb gashay

Qoddobka 15aad

Habka Maamulka Shirwaynaha

1. Shirweynaha xisbigu waxa uu socon karaa ugu yaraan laba cisho ugu badnaana shan cisho.
2. Maalinta koobaad waxa shir gudoonka noqonaaya hogaanka sare ee xisbiga ee lagu doortay shirweynihii kaa ka horeeyey. Waa in ay kasoo jeediyaan warbixino, wixii u qabsoomay Xisbiga intii ay xilka hayeen.
3. Maalinta 2aad Shirweynuhu waa inuu iska dhex doortaa shir gudoon ku meelgaar ah oo hagidoono shirweynaha oo ka kooban gudomiye ku-xigeen iyo xoghayahe.
4. Shir gudoonka waxa soo jeedinaaya hogaanka saree ee xisbiga waxaan cod 2/3 ku ansixinaaya xubnaha shirweynaha.
5. Shirweynah ayaa dooranaya hogaanka sare ee Xisbiga ansixin doonana:
 - a) Xeerka xisbiga
 - b) Barnamijka xisbiga
 - c) Xubnaha golaha dhexe.
 - d) Qaab xisabeedka xisbiga.

Qoddobka 16aad

Awooda iyo Waajibaadka Shirwaynaha

1. Shirwaynuhu waxaa uu dooranayaa Hogaamiye, Gudoomiye, Ku xigeen, Xoghayaha guud iyo ku xigeenka xoghayaha guud shantii sanaba mar.
2. Waxaa kale oo uu dooranayaa xubnaha Golaha Dhexe ee banaanaada ama cusub ama wuxuu u wakiilanayaa cidda awood uu u siiyo.
3. Shirwaynuhu wuxuu ansixinayaa xeerka iyo barnaamijka hogaaminta siyaasadeed ee Xisbiga iyo go'aanada ay usoo gudbiyaan Golaha Dhexe iyo gudiyada fulinta isaga oo habaynaya siyaasada guud ee Xisbiga.
4. Waxaa uu ka doodayaa warbixinaha loo soo gudbiyo iyo ajandayaasha loo soo diyaariyo isaga oo eegaya xaalada lagu horumarinayo hawlaha xisbiga, islamarkaana qiimaynaya warbixinaha loo soo gudbiyo, Waxaana uu go'aan ka soo saarayaa

- arimahaasi laga dooday.
5. Waxaa kale oo uu qiimaynayaa howlqabdkii gudida fulinta mudadii ay xilka haysay, wixii u qabsoomay, wixii qabsoomi waayay, sababta ay u qabsoomi wayday iyo sida loo xallinayo.

Qoddobka 17aad

Golaha Dhexe

1. Golaha Dhexe ee Xisbigu waxa uu ka kooban yahay 25 (Shan iyo Labtaan) xubnood oo lagu ansaxiyeey Shirweyniha iyo 10 (Toban Xubnood) oo Shir weynuhu awood u siiyeey Hogaamiyaha inuu Soo Magacaabo. Waa hay'adda ugu sarraysa xisbiga inta u dhaxaysa labada shirwayne.
2. Liiska xubnaha Golaha Dhexe ee lagu doortay shirweyne waa in liiskooda oo dhamystiran la geeyaa Xafiiska Gudiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka mudo aan kabadnayn 30 maalmood maalinta shirweynuhu dhamaado.
3. Xubinta Golaha Dhexe ee ay ku timaado xaaladaha ku xusan qodobka 8aad ee xeerkan waxa loo buuxinayaa habka saamiga goboleedka gudida heer gobol ee uu ka tirsanaa ayaa kusoo buuxinaaya mudo aan ka badnayn 45maalmood iyagoo usoo gudbinaaya xoghayaha golaha dhexe ama ku-xigeenkiisa.
4. Xubinta cusub waxa ansixinaaya gudida fulinta ee xisbiga waa inuu xoghayaha golaha dhexe qoraal rasmi ah ugu gudbiyaa Xafiiska Gudida Doorashooyinka Qaranka.
5. Shuruudaha xubinta golaha dhexe waa
 - a. Inuu/inay buuxiso shuruudaha ku xusan qodobka 5aad ee xeerka xisbiga
 - b. Kasoo jeedo saamiga heer gobol ama laan dibada ah
 - c. Bixiyaa qaaraanka ku waajibay xubinta golaha dhexe bilkasta.
 - d. Aqoon ahaan waa inuu yahay heer ilaa dugsi sare

Qoddobka 18aad

Hawlaha Golaha Dhexe

Hawlaha Golaha dhexe ee xisbigu waxay noqonayaan:

1. Wuxuu dooranayaa xubnaha Gudida Fulinta marka laga reebo Hogaamiyaha.
2. Waxa kale oo ay iska dhex dooranayaan saddex xubnood oo ah gudi hanti-dhawr oo u madax bannaan hawlhooda, islamarkaana toos ugu soo gudbin kara warbixintooda golaha dhexe.
3. Waxay ansixinayaan miisaaniyada xisbiga, waxaanay toosinayaan nidaamka maamulka, hogaaminta siyaasada xisbiga iyo barnaamijyada siyaasada xisbiga lagu hogaaminayo.
4. Waxay dhagaysanayaan warbixinaha ay usoo gudbiyaan Gudiga Fulintu waxayna qiimaynayaan waxqabadka gudiga iyo horumarka hawlaha xisbiga iyagoo ka doodaya arimahaasi isla markaana go'aan ka soo saaraya.
5. Golaha Dhexe wuxuu ku hagayaa Xisbiga istiraatiijiyada siyaasada ee ku salaysan wada tashiga iyo dimuqraadiyada iyadoo taladu ka imanayso xaga hoose una gudbaysa xaga sare.

6. Golaha dhexe waxa uu kor jeegtaynayaa hawlaha xisbiga waxaana uu dajin karaa nidaam casriya oo lagu maamulo hantida xisbiga, laguna hoggaamiyo hawlaha isla markaana waxa uu ka joojin karaa hawlaha cid-kasta oo ay ku caddaato inuu wax u dhimayo hawlaha xisbiga ama aanu si daacada u wadin hawlaha xisbiga.
7. Waxay iska dhex dooranayaan xoghayaha golaha dhexe iyo guddi-hoosaadyo. Guddi-hoosaad kastaana waxay iska dhex dooranayaan guddoomiye, g.xigeen iyo xoghaye.
8. Golaha dhexe waxa uu ansixinayaa heshiisyada dhexmara xisbiga iyo xisbi kale oo ku saabsan iskaashiyo wax-wada qabsi oo la xidhiidha arimaha siyaasada ee ay u soo gudbiyaan gudida fulintu iyaga oo ku ansixinaaya cod 2/3 ah.
9. Golaha dhexe waxa uu hubinayaa fulitaanka go'aamada hore loo ansixiyay iyo habka uu u fulay barnaamijka siyaasadeed ee xisbigu, waxaana uu tilmaamayaa habka ugu wanaagsan ee looga faa'iidayo fursadaha soo mara xisbiga, islamarkaana waxa uu xallinayaa wixii khilaaf ah ee ku yimaada mas'uuliyiinta sare ee xisbiga.
10. Wuxuu u codaynayaan cidda noqonaysa musharraxa madaxwaynaha.
11. Haddii ay xubin golaha dhexe ah ay ku timaado geeri ama uu ku waayo xubinimada sida ku xusan qodobka 8aad, waxaa soo magacaabaya xubinta lagu bedelayo laanta uu ka tirsanaa xubintaasi meesha ka baxday ka dibna waxaa ogolaanaya guddida fulinta waxaana ansixinaya kalfadhiga ugu horreeya ee golaha dhexe.

Qoddobka 19aad Fadhiyada Golaha Dhexe

1. Fadhiga golaha dhexe ee caadiga ah waxaa la qabanayaa sanadkii mar, laga bilaabo maalintii uu xirmay fadhigii ugu danbeeyay.
2. Waqtiga la qabanayo fadhiga golaha dhexe waxaa cayimaya Xoghayaha Golaha Dhexe, waa in xoghayaha Golaha Dhexe ku baahiyaa muddo aan ka badnayn 10 maalmood, haddii uu maqan yahayna waxaa muddadaa ku baahinaya ku-xigeenka Xoghaya Golaha Dhexe .
3. Haddii ay timaado duruuf ka dhigta lagama maarmaan in laqabto fadhi aan caadi ahayn waxaa soo jeedinaaya gudida fulinta oo ku ogolaanaya cod haldheeriya ama 1/3 Golaha dhexe. Waxaana fadhigaa lagu qabanayaa mudo aan ka badnayn labaatan maalmood.
4. Golaha Dhexe waxa uu yeelan karaa fadhiyo aan caadi ahayn ugu badnaan 2 jeer sanadkiiba.
5. Fadhiyada aan caadiga ahayn waxa ay ku qabsoomi karaan 50+ 11 xubnaha Golaha DhexeFadhiyada golaha dhexe waxa ajandahooda soo diyaarinaaya xoghayaha Golaha markuu la tashado hogaanka sare ee Xisbiga .

Qoddobka 20aad

Gudida Fulinta.

1. Gudida fulintu waa hay'ada ugu saraysa socod siinta hawlaha xisbiga, waxaana ay ka kooban tahay 11 xubnood oo sida ku xusan farqadda labaad ee qodobkan laga soo dhex xulay Golaha Dhexe, Mudada xilka ee Gudida fulintu waa afar sanadood oo ka bilaabmay maalinta shirwaynahu qabsoomay.
2. Gudoomiyaha Xisbigu marka uu la tashado hogaanka xisbiga waxa uu ka soo dhex xulayaa Golaha Dhexe xubnaha Gudida Fulinta noqonaya isaga oo hordhigaya kal-fadhiga koowaad ee Golaha Dhexe oo ku ansixinay cod hal dheeri ah.

Qoddobka 21aad

Waajibaadka Gudida fulinta

1. Gudida fulintu waxay ka masuul tahay hirgalinta iyo horumarinta barnaamijka siyaasadeed iyo dhaqan gelinta xeerka xisbiga.
2. Fulinta go'aanada lagu ansixiyay shirwaynaha iyo fadhiyada Golaha Dhexe iyo socod siinta hawlaha Xisbiga.
3. Diyaarinta miisaaniyada xisbiga, ajandayaasha la hordhigayo fadhiyada Golaha Dhexe iyo warbixinaha la xiriira wax qabadka Gudiga Fulinta ee dhabta ah.
4. Gudiga Fulintu wuxuu ansixinayaan xilalka guddiyada Gobollada, Degmooyinka, Laamaha, Xoghayayaasha Guddiyada Fulinta iyo hawl wadeenada iyagoo la tashanaya taageerayaasha xisbiga ee deegaankaas.
5. Guddida fulintu waxay u xil saaran tahay abaabulka iyo wacyi galinta dadweynaha iyo hirgalinta hadafka siyaasadeed ee xisbiga oo ah ismaamul iyo talo wadaag.
6. Gudiga Fulintu waxay iska xilsaarayaan sidii loo horumarin lahaa adeegyada bulshada iyada oo lala kaashanayo kaalmo dibadeed iyo hayadaha samafalka, iyaga oo dhawraya danaha guud, islamarkaana haya'dahaas u fududaynaya helitaanka khubaro waddani ah ama caalami ah.
7. Xubnaha Gudiga Fulinta waxaa waajib ku ah inay u gutaan si daacadnimo iyo isxilqaan ah hawsha loo xilsaaray, isla markaana dhawraan wada shaqaynta iyo xiriirka xubnaha kale iyo bulshadaba.
8. Fadhiyada caadiga ah ee Gudiga Fulintu waxay noqonayaan bishiiba mar waxaana shir gudoonka noqonaaya gudoomiyaha xisbiga hadii uu maqanyahayna gudoomiye ku xigeenka, hadii uu maqanyahayna Xoghayaha Guud, hadii wax degdeg ahi ay yimaadaan waxaa isugu yeeraya Gudoomiyaha ama in kabadan kala bar xubnaha Gudiga Fulinta 10 cisho gudahood.
9. Waxay ansixinayaan oo go'aaminayaan xubnaha xisbiga ka galaya golayaasha qaranka iyagoo la tashanaaya xaruma gobolada, degmooyinka iyo laamaha.
10. Gudida Fulintu waxa uu yeelanayaa gudi joogta ah oo ka kooban 3 xubnood oo ka kooban hogaanka sare ee xisbiga iyo 2 xubnood oo kale oo uu Gudiga iska dhex xulo

Qoddobka 22aad

Xilalka xubnaha Gudida Fulinta

Xilalka Gudida Fulintu waa:

1. Hogaamiye
2. Gudoomiyaha gudida fulinta.
3. Gudoomiye ku xigeen
4. Xoghayaha guud.
5. Ku xigeenka Xoghayaha guud.
6. Xoghayaha Siyaasadda
7. Xoghayaha Arrimaha gudaha, Federaalka, iyo Degmooyinka.
8. Xoghayaha Arrimaha Debada.
9. Xoghayaha Wacyigelinta
10. Xoghayaha Maaliyada
11. Xoghayaha Haweenka
12. Xoghayaha Dhalinyarada.

Qoddobka 23aad

Hogaamiyaha Xisbiga

1. Hogaamiyaha Xisbiga waxa dooranaya Shirwaynha Xisbiga.
2. Hogaamiyaha waa madaxa xisbiga, waxaanu guddoominayaa shirwaynaha iyo fadhiyada Golaha Dhexe.
3. Wuxuu masuul ka yahay diyaarinta hindise hogaamineed ka, qorshaha istiraatiijiga ah ee lagu balaarinayo taageerayaasha Xisbiga heer Federaal, Gobol, Degmooyin iyo laamo.
4. Wuxuu baadigoobayaa taageerada maadiga iyo tan macnawiga ah ee Xisbiga
5. Wuxuu bidhaaminayaa hiraal ka fog iyo hiigsiga Xisbiga. Wuxuuna Saxiixaa Qoraalada Rasmiga ah ee Xisbiga.
6. Waxa uu magaca xisbiga ku saxeexi karaa heshiisysada dhexmara xisbiga iyo xisbiyada kale ka dib markay Gudiga Fulintu ku ogolaato cod haldheeriya dabadeed waxaa la hor keenayaa fadhiga ugu horeeya ee Galaha Dexe.
7. Wuxuu ku hadlaa magaca xisbiga kagana qayb gali karaa shirarka gudaha iyo dibada isaga/iyada oo aan ku xadgudbayn xeerka iyo barnaamijka xisbiga.

Qoddobka 24aad

Shuruudaha Hogaamiyaha Xisbiga

1. Qof kasta oo u tartamaya Hogaaminta Xisbiga waa in uu buuxiyaa shuruudahan:
 - a) In uu yahay xubin xisbiga ka tirsan islamarkaana buuxiya shuruudaha xubinimo
 - b) In aan da'diisu ka yarayn 30 sano.
 - c) In aqoontiisu gaadhsiisan tahay heer Jaamacadeed
 - d) In uu Xisbiga ka tirsanadaa ugu yaraan labo sano
2. Qofna looma dooran karo Hogaamiyaha Xisbiga wax ka badan sedex jeer.
3. Jagada Hogaamiyaha waxa aay ku banana kartaa: a. Hadii ay Hogaamiyaha ku

timaado geeri b. Hadii aay burto mid ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay iyada oo aay ka go'aan gaarayaan 2/3 xubnaha Golaha dhexe c. Hadii uu iscasilo Golaha dhexena ka aqballo 2/3d, ama xilka looga qaado si Xeerkan waafaqsan

Qoddobka 25aad

Guddoomiyaha Gudiga Fulinta

1. Guddoomiyuhu waxa uu socodsiiyaa hawl maalmeedka xisbiga.
2. Guddoomiyuhu waxa uu ka soo jeediyaa shirwaynaha iyo fadhiyada Golaha Dhexe warbixino, tala bixino ku saabsan siyaasada iyo qorshaha hawlaha xisbiga
3. Guddoomiyuhu waxa uu xisbiga ku haggaa xeerka iyo barnaamijka siyaasada ee loo jaan gooyay.
4. Guddoomiyuhu waxa uu magacaabayaa gudida qabanqaabada shirweynaha waxaana ogolaanaya g.fulinta.

Qoddobka 26aad

Guddoomiye Ku-xigeenada Xisbiga

1. Xisbigu waxa uu yeelanayaa Guddoomiye ku xigeen waxaana dooranaya Golaha Dhexe.
2. Shuruudaha Guddoomiye-ku-xigeenka waxa aay la mid yihiin kuwa Guddoomiyaha
3. Wuxuu qabanayaan hawlka oo uu u igmado guddoomiyaha Gudiga Fulinta waxaanay ka caawinayaan socodsiinta hawlaha xisbiga.
4. Marka uu maqan yahay guddoomiyuhu waxa uu hawshiisa u sii igmanayaa guddoomiye ku xigeenka oo fulinaaya hawlihii looga baahnaa oo dhan, hadii isagu uu maqanyahay waxaa hawsha sii qabanaya xogahaya guud.

Qoddobka 27aad

Xoghayaha Guud iyo Ku-igeenkiisa

1. Xoghayaha Guud ee xisbiga iyo ku xigeenkiisa waxaa dooranaya Golaha Dhexe.
2. Xoghayaha guud waxa uu masuul ka yahay socod siinta maamulka xisbiga guud ahaan.
3. Waxa uu diyaarinayaa qoraalada warbixinada miisaaniyada ajandayaasha lagaga doodayo fadhiyada G/fulinta, G/dhexe iyo shirwaynaha.
4. Xoghayaha guud waxa uu masuul ka yahay daba-galka fulinta go'aamada la ansixiyay iyo hirgalinta barnaamijyada siyaasada, isaga oo la kaashanaya xoghayaha ka muusalka ah hawshaas.
5. Xoghayaha guud waxa uu maamulayaa shaqaalaha xisaabaadka isla markaana waxa uu habaynayaa oo uu kaydinayaa dhukumentiga xisbiga, waxaana uu diiwaan-gelinayaa oo uu ilaalinayaa hantida xisbiga.
6. Xoghayaha guud waxa uu madax u yahay xoghayayaasha kale ee Gudiga Fulinta waxaana uu ku kormeerayaa habsami u socodka hawlaha ay ka masuulka yihiin.
7. Xoghayaha guud waxa uu qabanayaa hawshii kale ee uu u xilsaaro Hogaamiyaha Xisbiga.

Qoddobka 28aad

Musharaxiinta Madaxweyne iyo madaxweyne-ku-xigeenka

1. Hogaamiyaha Xisbiga ayaa ah musharaxa Madaxweynaha ee Xisbiga.
2. Xubina looma sharixi karo musharax madaxweyne wax ka badan laba jeer

Qoddobka 29aad

Musharaxiinta Golayaasha Sharci dejinta iyo Deegaanka

1. Qof kasta oo u tartamaya golayaasha sharci dejinta ama deegaanka waa in uu buuxiyaa shurudaha hoos ku xusan:
 - a) In uu yahay xubin xisbiga ka tirsan oo buuxiyaya shuruudaha xubinimo, bixiyana qaaraanka Xisbiga
 - b) In uu buuxiyo/buuxiso shuruudaha Xeerarka Dalku uga baahan yihiin.
 - c) In uu yahay ruux aaminsan barnaamijka Xisbiga.
 - d) In uu bixiyo lacagta deebaajiga ah aay go'aamiyaan Gudida Fulinta ee Xisbiga.

QAYBTA 3AAD:

Qoddobka 31aad

Qaybaha Xisbiga.

1. Gobol kastaa wuxuu yeelanayaa gudi joogta ah oo ka kooban Sagaal xubnood, gudidaasi waxay yeelanaysaa gudoomiye iyo gudoomiye xigeen, xoghaye iyo xubnaha kale oo ka mid noqonaya hawl wadeenada xisbiga.
2. Xoghaya gobolku waa in uu noqdaa xubin ka tirsan Golaha Dhexe ee Xisbiga
3. Gudoomiyaha, Gudoomiye ku-xigeenka iyo Xoghayaha gobolka waxaa magacaabaya Gudoomiyaha Xisbiga markuu la tashado Gudida Fulinta
4. Degmo kastaana waxay yeelanaysaa gudi joogta ah oo ka kooban shan xubnood oo yeelanaya gudoomiye, gudoomiye xigeen iyo xoghaye iyo xubnaha kale oo noqonaaya hawl wadeenada xisbiga ee degmada.
5. Gudoomiyaha, gudoomiye-xigeenka iyo xoghayaha Degmada waxa magacaabaya Gudoomiyaha gobolka markuu la tashada gudida joogtada ah ee gobolka.
6. Tuulooyinka iyo xaafadaha waxay yeelanayaan gudi joogta ah oo ka kooban Sedex xubnood oo yeelanaya gudoomiye, gudoomiye xigeen iyo xoghaye. Sadexdan masuul ee ugu sareeya tuulada ama xaafadda waxa magacaabaya gudoomiyaha degmada aay hoos timaado.
7. Laamaha debadda waxaa loo aqoonsanayaa heer degmo ama laan iyadoo loo eegayo baaxadda jaaliyadda Somaliyeed ee deggen meeshaas, waxaana lagu kala saarayaa taageerayaasha xisbiga ee bixiya qaaraanka xisbiga.
8. Madaxda laamaha xisbiga ee debeda waxa magacaabaya Gudoomiyaha Xisbig marka uu la tashado Gudida Fulinta

Qoddobka 32aad

Hawlaha Guddiyada Xisbiga.

1. Fulinta barnaamijka siyaasada ee xisbiga.
2. Diiwaan galinta xubnaha ka mid noqonaaya xisbiga.
3. Abaabulka iyo wacyi galinta dadweynaha.
4. Xidhiidhka iyo wada tashiga xafiisyada xisbiga ee tuulooyinka, laamaha dibada, degmooyinka, gobollada iyo xarunta guud, iyada oo taladu min tuulooyinka ilaa xarunta guud ee xisbiga ay ku dhisan tahay hab dimuqraadi ah.

Qoddobka 33aad

Guddida Anshaxa

1. Sida ku Cad Jadwelka 4-aad ee Xeerka Axaabta Siyaasadda, Xisbigu Wuxuu Yeelanayaa Labo Darajo oo Guddiyo Anshax iyo Xalinta Khilaafaadka Xisbiga Dhexdiisa,kuwaas oo kala ah:-
 - a) Gudiga Anshaxa iyo Xallinta Khilaafaadka Xisbiga Dhexdiisa ee Heer Gobol,
 - b) Gudiga Anshaxa iyo Xallinta Khilaafaadka Racfaanka oo Heer Qaran ah.
2. Kalfadhiga ugu horeeya ee golaha dhexe yeesho shirweynaha kadib waa in lagu sameeyaa gudi anshax oo heer qaran
 - a) Tirada gudida anshaxu heer qaran waa in ay noqotaa todobo xubnood
 - b) Gobol waliba waxa uu yeelanayaa gudi anshax oo ka kooban 5 xubnood oo aay sameeyeen Gudida heer gobol

Qoddobka 34aad

Falalka Anshax Marinta

1. Xubin kasta ee Xisbiga ka tirsan hadii uu la yimaado xadgudub anshax marin waxaa anshax marinaya Gudiga Anshaxa heer Qaran ama Gobol.
2. Falalka keeni kara Anshax marin waa hadii uu
 - a) Ku gafa xeerka xisbiga.
 - b) Ka horyimaada mabaadiida siyaasadeed ee Xisbiga u degsan.
 - c) Gudbisa sir xisbigu leeyahay.
 - d) Lunsata dhaqaale xisbigu leeyahay

Qodobka 35aad

Habraaca Anshax Marinta

3. Gudigu wuxuu awood u leeyahay in ay talaab anshax marin ka qaadan xubinta ay ku helaan eedaha ku xusan qodobka 35aad, waxayna iyaga oo eegaya culayska gefka xubintu gashay qaadayaan talaabooyinka soo socda;-
 - a) Waxay u gudbinayaan qoraal canaan
 - b) Waxay siinayaan fursad uu isku difaaco
 - c) Waxay ku wargelinayaan gefka loo haysto mudo 10 cisho ka hor inta aan

- talaab laga qaadin
- d) Waxay ku qaadi karaan hadba inta uu gefka la egyahay
 - i. Xil ka qaadis ama shaqa ka fariisin mudo aan 14ido1414 badnayn.
 - ii. Ganaax lacageed oo u dhexeeya una dhiganta \$100 ilaa \$1000
 - iii. Eryid ama talaabo kasta oo kale oo ku haboonaata
 3. Xubintii Gudi Anshax heer gobol xukunto 14ido14 qanci waydaa waxa aay u rafcaan qaadan kartaa Gudiga Anshaxa ee heer qaran.
 4. Muddada Gudiga Anshaxu heer qaran waa afar sano oo ka bilaabmaya maalinta la doorto.

Qodobka 36aad

Dowrka Haweenka iyo Dadka laga tirada badan yahey

1. Xisbigu wuxuu aaminsanyahay in haweenku lafdhabar u yihiin guud ahaan hawlaha siyaasada, gaar ahaan kuwa xisbiga la'aantood na la dhaqaaqi karin, ayadoo xoog weyn lagu bixinayo in haweenku kaalin hogaamineed ka qaataan siyaasada dalka.
2. Xisbigu wuxuu taageero dhinac kasta ah siinayaa ururada Haweenka iyo kuwa bulshada rayidka ah ee ay dumarku hogaamiyaan ee ka shaqeynaya horumarinta dumarka iyo ilaalinta dhaqanka wanaagsan ee haweeneyda Soomaaliyeed ay xambaarsan tahey.
3. Xisbiga Wadajir waxey u tahay mabda' ilaalinta Ururada Haweenka Soomaaliyeed iyo Dadka deegaamo looga tira badan yahay deggan, ayadoo qeybahaas tixgalin gaar laga siinayo hawl wadeenada iyo shaqaalaha xisbiga dhexdiisa.
4. Waxey Yeelanayaan Qoondo ahaan Saamiga 30%Shaqaalaha iyo Hawl wadeenada Xisbiga iyo Golayaashaba.

Qodobka 37aad

Xafiiska Mutadawiciinta, Shaqaalaha iyo Hawl Wadeenada Xisbiga.

1. Xisbigu wuxuu yeelanayaa Xafiis qaabilsan mutadawiciinta diyaarka ah, Shaqaalaha iyo hawl wadeenada Xisbiga.
2. Xafiiskani wuxuu si toos ah u hoos imaanayaa Xoghayaha Guud ee Xisbiga.
3. Shaqaalaha & mutadawiciinta diyaarka ah waxaa soo diyaarinaya saraakiisha Xafiiska, marka ogolaansho iyo baahi ay ka timaado Xafiiska Xoghayaha Guud ee Xisbiga.
4. Shaqaalaha iyo hawl wadeenada Xisbigu ma xadidna ee waa hadba baahidu shaqo inta ay la egahey.
5. Xafiiska shaqaalaha iyo hawl wadeenada Xisbiga wuxuu dhawrayaa kaalinta Haweenka iyo Dadka deegaamo looga tira badan yahay deggan, 14ido kale xeerka Shaqaalaha Rayidka ah iyo sharciyada Dalka u Deggan.
6. Siyaasaadka Xisbiga ee shaqaala qaadashada & hanaanka loo marayo waxaa golaha fulinta xisbigu ka soo saarayaa xeer gaar ah, kaasoo dhaqangal noqon doono marka uu ansixiyo golaha dhexe.

Qodobka 38aad

Habka Xisbi Ku Biiridda Ama Isbaheysi Xisbiyo Kale.

- A) Xisbigu wuxuu ku biiri karaa Xisbi, Xisbiyo ama Isbaheysi Xisbiyo kale, waxayna ku imaan kartaa xaaladaha Soo socda:
- 1) Xisbiga oo u baahda aqlibiyad kuraas Baarlamaan, si uu Xukuumad u soo Dhis.
 - 2) Xisbiga oo u arka in uu u baahan yahey Isbaheysi si loo meel mariyo fikrado io himilo siyaasadeed uusan keligii Ku fley.
 - 3) Hadii uu Xisbigu waayo ama arko in uusan heysan xubno ku fillan si uu u Noqdo Xisbi Kumeel gaarka ka gudba oo u gudba Xisbi Rasmi ah.
 - 4) Dhamaan Qodobada ku xusan xarafka (a) ee Isla qodobkan waxaa soo jeedin kara hogaanka sare ee Xisbiga ama ugu yaraan 3 sadex xubnood oo xilal muhiim ah u haya Xisbiga kana mid ah Guddiga Fulinta.
 - 5) Dhamaan soo jeedinta Qodobadan waxaa ansixinaya Iskuna raacaya xubnaha Gudiga Fulinta 3 Meelood Labo., ayadoo go'aankaas loo gudbinayo golaha dhexe si uu u ansixiyo.

Qodobka 39aad
Xasaanadda iyo Saxiixa Idman ee Saraakiisha Xisbiga.

1. Dhamaan Xubnaha Gudiga Fulinta, Xafiisyada Madaxa Banaan ee Xisbigu waxey yeelanayaan xasaanad iyo saxiix idman oo la xiriira hawlhooda Xisbiga dhexdiisa.

Qodobka 40aad.
Dokumeentiyada Siyaasadeed ee Xisbigu Soo Saaro.

1. Dokumeentiyada siyaasadeed ee xisbigu soo saaro waxey lahaanayaan tirsi, tixraac iyo taariikh.
2. Dokumeenti kasta oo siyaasadeed waa in uu lahaado saxiixa hogaamiyaha Xisbiga, Gudoomiyaha Xisbiga iyo Xoghayaha Guud ee Xisbiga.
3. Ururinta, Ilaalinta & Diyaarinta Documentiyada Siyaasadeed ee Xisbigu Soo Saaro Waxaa u Xilsaaran Xoghayaha Guud ee Xisbiga.
4. Dokumeentiyadaasi waxay noqonayaan
 - a) Dokumiintiga sanadlaha ah ee Gudiga Fulinta
 - b) Dokumiintiga sanadlaha ah ee Golaha Dhexe
 - c) Dukumeentiga Sanadlaha ah ee Xisaab Celinta Xisbiga
 - d) Dokumiintiyada Heshiisyada Siyaasadeed
 - e) Qoraalada Rasmiga ah ee Xisbiga

QAYBTA 4AAD:

Qodobka 41aad
Maamulka, Maaliyadda & Hantida xisbiga Dakhliga & Kharashka

1. Xisbig Wadajir hantidiisa guurtada iyo ma guurtaba waxaa u xilsaaran Hanti Dhawrka Xisbiga.
2. Gudida hanti dhawrku waxay ka koobantahay shan xubnood oo G/dhexe iska soo dhexdoortaan oo u madax banaan shaqadooda.
3. Gudidaasi waxay toos u baari karaan dhamaan xafiisyada xisbiga iyo hantida

- xisbiga waxayna warbixin toosa u gudbin karaan Golaha Dhexe waxayna toosin karaan maamulka xisaabaha ee Xisbiga.
4. Gudidaasi waxay hubinayaan dhammaan hantida xisbiga haddii ay tahay guurto iyo ma-guurtaba.
 5. Guddidaasi waxay shaqada ka joojin karaan hadii ay la kulmaan cid si khaldan ugu tagrifashay hantida xisbiga, iyaga oo la socodsiinaya madaxda ka sarraysa haddii ay u caddaato in lagu tagri falay hantida xisbiga waxay u gudbin karaan Golaha dhexe oo goaan ka gaadhaya.

Qodobka 42aad **Dakhliga Xisbiga**

1. Dakhliga xisbiga waxa uu ka imaanayaa:
 - a) Qaaraanka ay bixiyaan xubnaha xisbiga qaab 3 biloodle ahna loo hormarinayo.
 - b) Maalgashi uu xisbiga sameeyey.
 - c) Deeq aan shardi ku xirnayn.
 - d) Sadaqada iyo kaalamda xubnaha ururka
 - e) Iyo Meelo kale hadii aysan shuruucda dalka ka hor imaanaynin.
2. Kharashka & xisaabaadka xisbiga.
 - a) Xisbigu wuxuu yeelanayaa ku tala-gal miisaaniyad sanadeed dakhli iyo kharash isugu dheeli tiran.
 - b) Waxaa kaloo yeelanayaa xisaab-xir sanadeed dakhli iyo kharash ah
3. Diiwaanka guud ee hantida guurtada iyo maguurtada ee xisbiga.
 - a. Xisbigu waxa uu yeelan karaa hanti guurto ah ama ma guurto ah. Hantidaasina wax ay ka iman kartaa.
 - i. Kaalmada ay xukuumadu si siman u siiso Xisbiyada Qaranka.
 - ii. Khidmada ama fiiga ay bixiyaan musharixiinta golayaasha qaranka u tartamaya.
 - iii. Qaaraanka ay bixiyaan xildhibaanada xisbiga usoo baxaa.
 - iv. Faahfaahinta maaliyadda xisbigu waxey ku soo baxeysaa xeerhoosaadka maaliyadda

Qodobka 43aad **Habka Maamulka iyo Maareynta Hantida Xisbiga.**

1. Xisaab-xir Sanadeedka iyo dhaqdhaqaaqa xisaabta Xisbiga waxaa u xilsaaran waxna laga weydiinayaa xoghayaha maaliyadda iyo xisaabyaha guud ee Xisbiga, iyadoo uu mar kasta xog ogaal u noqonayo xoghayaha guud ee Xisbigu si uu ula wadaago hogaanka Xisbiga iyo Golayaashiisa.
2. Warbixinada la xiriira xisaabaadka Xisbiga hadii ay soo dalbadaan Hay'ado ka baxsan Xisbiga waxaa la ogeysiinayaa Hogaamiyaha Xisbiga, Gudoomiyaha G. Fulinta iyo Xoghayaha Guud ee Xisbiga, ogolaanshiyahooda ayaana lagu bixinayaa.

Qodobka 44-aad. **Baabi'inta Xisbiga iyo Hantidiisa.**

1. Hadii xisbiga ay soo waajahdo duruufo uu ku shaqayn waayey sida
 - a) hanti La'aan,
 - b) khilaaf soo noq-noqda oo xal kama danbeys ah loo waayo
 - c) waxyaabihii kale ee caqabad ku noqda socodsiinta hawlaha Xisbiga oo laga maarmaan ka dhigaya burburka Xisbiga.
2. Hadii sidoo kale uu Xisbigu baaba'oo isaga oo talada Qaranka haya hantida Xisbigu Waxey Noqoneysaa Hanti Qaran.
3. Markiise uu Xisbigu Baaba'oo, Isagoon Talada Qaranka hayn, hantida Xisbiga waxaa lagu wareejinayaa xisbiyada ay bah wadaagta yihiin xisbiga Wadajir.
4. Marka la iclaaminayo baab'inta xisbiga waxaa soo jeedinaya golaha fulinta, waxaana loo yeerayaa shirweyne degdeg ah si arrintan masiiriga go'aan rasmi looga qaato.

Qodobka 45-aad Doorashooyinka

1. Xisbigu wuxuu yeelanayaa Guddi Madaxbanaan ee Doorashooyinka oo maamulaya heerarka kala duwan ee Xisbiga.
2. Shirweynaha Guud ee Xisbiga ayaa dhisaya Guddiga Madaxbanaan ee Doorashooyinka Xisbiga.
3. Xeerka ay ku shaqeeynayaa Gudigaas waxaaa Ansaxinaya G/dhexe ee Xisbiga.
4. Tirada Guddiga Doorashooyinka waa inayna ka badnaan toddobo xubnood .
5. Masuuliyaddaha Guddiga Doorashooyinka waxa ka mid ah:
 1. Inay maamulaan doorashooyinka dhammaan Hay`adaha Xisbiga ee Heer kasta.
 2. Inay si joogta ah u diiwaan geliyaancod-bixiyayaasha dib u eegisna ku sameeyaan xaashiyaha cod-bixiyayaasha
 3. Inay diiwaan geliyaan musharaxiinta doorashooyinka
 4. Xallinta cabashooyinka doorashooyinka
 5. Fududeynta kor-joogista, ilaalinta iyo qiimeynta doorashooyinka.
 6. Wacyi gelinta cod-bixiyayaasha
6. Golaha fulinta xisbigu wuxuu magacabaayaa guddiga xallinta cabashooyinka doorashooyinka.

Qoddobka 46aad

Nidaamka loo marayo wax kabadelidda iyo kaabista Xeerka Xisbiga

1. Wax ka bedelka iyo kaabista xeerka xisbiga waxa la samayn karaa shirweynaha Xisbiga waxaana awooda ansixintiisa leh shirweynaha Xisbiga.
2. Hadii ay timaado arin lagama maarmaan ka dhigaysa in kaabis ama wax kabadel qodob ama qodobo xeerka ka mid ah waxa soo jeedinaaya hogaanka sare ee xisbiga ama gudida fulinta oo soo diyaarinaaya iyagoo u maraya wax kabadelka iyo kaabistu mid waafaqsan xeerka xisbiga iyo xeerarka dalka.
3. Hogaanka sare iyo gudida fulintu waa in ay soo hordhigaan soo jeedinta wax kabadela iyo kaaabista golaha dhexe ee xisbiga in la sameeyo iyo in kale, cod

ayayna u qaadayaan 1/3 xubnaha Golaha Dhexe . Golaha dhexee hadii uu ogolaado in xeerka lagu sameeyo kaabista iyo wax kabadelka waxa waajib ku ah in ay u gudbiyaan haayada sharci ahaan ka sareysa oo ah shirweynaha rasmiga ah ama shirweyne aan caadi ahayn.

4. Shirweynuhu markuu helo soo jeedinta iyo ogolaanshaha golaha dhexe waxa u banaan inuu ansixiyo iyo inuu diidoba.

Qoddobka 47aad

Fasiraada Xeerka Xisbiga

- 1) Hadii xeerka xisbiga khilaaf sharci ka yimaado waxa hogaanka sare ee xisbiga ku waajib ah in la diwaan galiyo qodobada ama faqrada laysku khilaafsanyahay fasirkooda.
- 2) Hogaanka sare waa inuu hordhigaa qodobadii uu diwaangaliyey kalfadhiga golaha dhexe ee rasmiga ah ama aan caadiga ahayn.
- 3) Golaha dhexe ee xisbiga waxa ku waajib ah inuu dhageysto doodaha fasiraadaha dhinacyada fasirka ku doodaya, kadibna waa in ay gudi ka kooban golaha dhexe iyo sharci yaqaano aan xisbiga ka tirsanayn u xilsaartaa fasiraada.
- 4) Gudiga loo xil saaray soo fasirka waa in ay usoo gudbiyaan xoghayaha golaha dhexe isagoo soo hordhigaaya kalfadhi aan caadi ahayn oo qabsoomaya ugu badnaan afar bilood marka go'aanka gudida loo xilsaaray aay xoghayaha u soo gudbiso
- 5) Hadii dhinac ku qanciwaayo fasiraada gudida waxa u furan in ay ka dalbadaan in loogu gudbiyo maxkamada dastuuriga ah ee dalka iyadoo codsigaas uu qori doono xoghayaha golaha dhexe ama ku xigeenkiisu

Qoddobka 48aad

Xeer-hoosaad

1. Golaha dhexe waxa uu soo saari karaa xeer hoosaadyo aan ka horimanayn xeerkan

Qoddobka 49aad

Dhaqangalka Xeerka Xisbiga

1. Xeerkanai waxa uu dhaqan gelayaa marka uu ansixiyo shirwaynaha Xisbiga.

Dhamaad